






SHURUUDAHA BOOQASHADA

Children's
MINNESOTA

Heerka 0 shuruudaha booqashada ee qeybaha NICU, ICC iyo SCN

Iyadoo laga jawaabayo korona faayrus ama COVID 19 oo dunida dhan saameeyey, laga bilaabo Talaado 10-ka Maajo, 2020, iyo ilaa aan soo saarno ogeysiis kale, shuruudaha soo socda ayaan sameynay si aan u difaacno bukaanka, qoysaska, dadka booqashada ku yimaada iyo shaqaalaha.

1. Masuulka sharciyeysan mar kasta ayey imaan karaan oo looma tixgelinayo sida dadka booqashada ku imaanaya.
2. Laba masuul oo sharciyeysan oo joogto ah ayaa la joogi kara qolka ilmaha bukaanka ah inta la daaweynayo. Haddii uu jiro hal masuul oo sharciyeysan oo keliya, waxa uu qofkan keensan karaa hal qof oo kale oo si joogto ah ula jooga inta ilmaha la daaweynayo.
3. Lama oggola dad kale oo booqasho ku imaanaya, oo walaalaha ayaa ka mid ah. Waxaa macquul ah in dadka qaarkood laga yeelo booqashada, laakiin dadkaasi waa in ay kala hadlaan maamulaha daryeelka bukaanka (patient care manager) ee qeybta ay u socdaan.
4. Labada masuul ee la soo oggolaaday waxaa khasab ah in maalin kasta la hubsado caafimaadqabka oo waxaa la siin doonaa waraaq magacoodu ku qoran yahay oo midabkeedu yahay cagaar, jaalle ama guduud. Faahfaahinta waraaqaha magaca:
 -  Cagaar — Booqashada bukaanka oo aan la iska rabin maasgaro
 -  Jaalle — Booqashada bukaanka oo la iska rabo in la xirto maasgaro
 -  Guduud — Booqashada goobaha bukaanka lama oggolaan karo, oo weliba maasgaro waa in la xirto
5. Labada masuul ee la soo oggolaaday booqashada looma diidayo iyagoo qaba calaamado fudud oo ah neefmareenka, laakiin maasgaro ayaa khasab ku ah.
6. Qof kasta oo aan wadan waraaq midab keh looma oggola booqashada goobaha daryeelka bukaanka.
7. Meelaha NICU iyo SCN, walaalaha ay da'doodu tahay 2 sano iyo wixii ka weyn ayaa booqasho ku imaan kara ilaa 15 daqiiqo si ay ula kulmaan ilmaha cusub ee ay walaalaha yihiin. Walaaluhu waa in ay yihiin carruur ay waalidka ku wada nool yihiin isku guri iyo isku cinwaan.
8. Meelaha NICU iyo SCN, ayeeyada iyo awoowaha nuunnaha waxay soo booqan karaan hal mar ilaa 15 daqiiqo si ay ula kulmaan ilmaha cusub ee ay waalidka u yihiin, laakiin marka hore waa in ay ka soo gudbaan baarista caafimaadqabka.
9. Labada masuul ee la soo oggolaaday waxaa laga rabaa in uu gacmaha ku nadiifiyo goobta lagu hubiyo caafimaadqabka ka hor intaysan soo gelin qolka ilmaha.
10. Labada masuul ee la soo oggolaaday waxaa laga codsan karaa in ay xirtaan maasgaro ama wax kale oo ay isbitaalka dhexdiisa ku dhex xiran doonaan (sida bac weyn, gacma-gelis).
11. Shaqaalaha waxaa laga yaabaa in ay iyagu maasgarada u xirtaan naftooda ama baqqabidda bukaanka.
12. Labada masuul ee la soo oggolaaday isbitaalka waa laga saari karaa haddii ay raaci waayaan shuruudaha iyo maasgarada marka laga rabo.
13. Waxaa macquul ah in shuruudaha la iska dhaafo. Masuulka sharciyeysan waxa ay arrimahaas kala hadli karaan kalkaalisada ilmaha ama adeegaha dadweynaha.